



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

**Hadalqoraalka kalfadhigii 3-aad**

**Documentiga Kol.3-aad 1aad F.2-aad**

**14/09/2013**

---

**Kalfadhiga3-aad**

**Fadhigiisa 2aad.Taariikhda 14/09/2013,saacadda12:00ghsaacadda 12:30gd.**

**Guntinta:142**

**Ajendaha:**

- 1. Furinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 2. Ansixinta anjedaha**
- 3. Warbixinta Safaraddii**
  - a. Wadanka Uganada {Xil.Cabdullaahi Maxamed Xirsi}**
  - b. Wadamka ingiriiska {Xil. Cabdikaafi Macalin Xasan}**

**Shir- Guddoonka:Guddoomiye Kuxigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka mudan e  
Jeylaani Nuurlikar,**

Shirka waxaa furay Guddoomiye Ku/xigeenka1-aad ee Golaha Shacabka Mudane Jeylaani nuur likar ,waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay Xil.Gaarane.

Guddoomiyaha ayaa Xildhibaanada kacodsaday in la ansixiyo ajendaha ,kadib waa la anixiyay.Guddoomiyaha wuxuu u soojeediyay Xildhibaanada in waqtiga la ilaaliyo si shaqada adag ee Golaha hortaalo loo fuliyo . Guddoomiyaha ayaa wuxuu u yeeray wafdigii booqsahada ku tagay dalkaUganda in ay warbixinkooban ka soo jeediyaan ,wuxuuna u yeerayXil. C/llahi Maxamed Xirsi.

Xildhibaanaka Wuxuu akhriyay warbixinta ku saabsan wafdigii uu hogaaminaayay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, oo booqashada ku tagay isaga iyo wafdigii uu hogaaminayay Tr.12-16/ 2013 dalka Uganda wuxuuna sheegay in halkaas sidiiran loogu soodhaweeyay ,ujeedada safarka Guddoomiyaha iyo wafdigiiisa ay ku tageen dalka Uganda ay muhiimadeeda ahayd in la mataaneeyo labada Baarlamaan,waxaana hishiiskaasi u sixiixay Guddoomiyaha Baarlamaanka{**Muxamed SHEekh Cusmaan iyo dhigiisa dalka Uganda Mudane Rebecca kadaga.**}

Kadib ,Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Guddiga Golaha Shacabka ee safarka ku tagay dalka Ingiriiska si uu warbixin uga soo jeediyoXil. C/kaafi Mocalin Xasan, kadib, markii lawaayay guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in shirka uuxiranyahay.

**Kalfadhiga 3-aad kulankiisa 2-aad uu shir-guddominayay Guddoomiye**

**Ku/xigeenka1-aad Mudane Jeylaani Nuur likar, ayaa wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddana waxey ahayd 12:30gd.**